

**X.M.J. 13 Maarso 1962, lamba. 94**

**Guddiga aan caadiga ahayn, ee kontoroolka shaqaalaha maalinlaha ah.**

**MADAXWEYNAHA**

Markuu arkay Qod. 85, ee Dastuurka;

Markuu Garwaaqsaday baahida loo qabo in lagu dhaqaaqo magacaabista Guddi kontorool oo hawshiisu yahay in uu ku dhaqaaqo (a) xaqiijinta tirada shaqaalaha maalinlaha ah ee shaqeeya ama u-shaqeeya Dowladda iyo hayadaha Dowladda, ee ku xusan Qod. 90 (2), ee Dastuurka; (b) xaqiijinta culeyska lacageed, oo cusleynaya miisaanadahooda; kontoroolka la xiriira saxnimada qoritaanka iyo shaqo ku-haynta kuwa ay khuseyso (daneeyayaasha); (c) hawl kastoo kale oo leh dabeecad kormeer;

Markuu Tixgeliyey baahida loo qabo in la gooyo guud ahaan Guddiga horey loo soo sheegay;

Markuu Dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Kaddin Soojeedinta wasiirka Kowaad;

**WUXUU XEERAYAA:**

**Qod. 1**

Waxaa la dhisayaa Guddiga aan caadiga ahayn, ee kontoroolka shaqaalaha maalinlaha ah.

**Qod. 2**

Guddigu hawlahiisu waa in uu ku dhaqaaqo:

- xaqiijinta tirada shaqaalaha maalinlaha ah, ee shaqada ku jira, ama u-shaqeeya Dowladda iyo weliba Hayadaha Guud, ee ku xusan Qod. 90 (2), ee Dastuurka;
- xaqiijinta culeyska lacageed (dhaqaale) oo sabataas darteed cusleynaya miisaaniyadaha ay kala leeyihhiin;
- kontoroolka la xiriira saxnimada qoritaanka iyo shaqo ku haynta kuwa ay khuseyso (daneeyayaasha),
- hawl kastoo kale oo leh dabeecad kormeer.

**Qod. 3**

Guddigu waxa uu ka ooban yahay xubnaha soo socda:

- 1) Hantidhowraha – Guddoomiye;
- 2) Xisaabiyaha Guud – Xubin;
- 3) Sarkaal Sare, ee Ciidanka Boliiska – xubin uu soo cayimo Wasiirka Gudaha;
- 4) hawlwadeen ka tirsan Guddoonka Golaha Wasiirrada – Xubin uu soo cayimo wasiirka Kowaad;
- 5) hawlwadeen ka tirsan Wasaaradda Lacagta (Maaliyadda) – Xubin uu soo cayimo Wasiirka Lacagta;
- 6) hawlwaheen uu soo cayimo Wasiirka Kowaad ayaa qabanaya hawlaha xoghaye.

**Qod. 4**

Guddiga guud ahaatiisa ama xubin ksta gaar ahaateeda waa geli karaan , sababo la xiriira xilalkooda (waajibaadkooda), xafiis kasta oo guud, waxa ay arati uga bogan karaan wixii qoraallo, dokumeenti iyo waraaqo ah, nuqullo minguurina ka qaadan karaan, waxa ay hawlwadeennada iyo karaaniyaasha guud weydiisan karaan wixii faahfaahinno iyo caddeymo

lagama maarmaan ah.

Agaasimeyaalka, hawlwadeennada iyokaraaniyaasha, ee xafiisyada guud oo la kormeero, inayGuddiga iyo xubnahiisa u fidiyaan wada-shaqayn buuxda.

#### **Qod. 5**

Guddigu waxa uu ku dhaqaaqayaa fulinta hawlalihiisa waqiga ugu gaaban, ee suurtagalka, iyo, si kastaba, oo aan dhaafsiisneyn lix bilood oo ka bilaabata dhaqagalka Xeerkan.

Markuu dhammeAeyo hawlalihiisa, Guddigu waxa uu natatiijada oo ay la socoto warbixin qoraal ah dirayaa Wasiirka Kowaad, asaga oo diyaarinaya wixii soojeedin ah ee la xiriira.

Muqdisho, 13<sup>ka</sup> maarso 1962.

**AdEn Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka Kowaad

**Cabdirashiid Cali Sharmarke**

Waa arkay waana Diiwaangeliyet –

Diiw. lamba. 1 – xaashi lamba. 130.

Muqdisho, 22/28 Abiriile 1962

Hantidhowraha: **Axmed Daahir**